OGAYSIISKA SANNADLAHA AH EE XUQUUQDA WAALIDKA IYO ARDAYGA

Guddiga Iskaagshiga Dugsiga

Lacagta Ardayga, Ganaaxa, Dalacaadda

Xuquuqaha Waxbarasho ee Qoyska iyo Sharciga Asturnaanta

Cinwaanka VI, IX, ADA, Qaybta 504

Caddaynta Isirka iyo Dhalashada Ardayga

Waxbarashada Ardayda Itaalka daran

Asluubta iyo Dhishibiliinka Ardayga

Ilmana Laga Tagi Maayo

Dugisga La xusho

Kadeedka

Sharciyada iyo Barnaamijyada

Dusiyada Dadwaynaha ee Denver waxay macluumaadkan u soo bandhigtay iyada oo u hoggaansan shuruudaha sharciga ah. Waxaanu rajaynaynaa in uu ku caawin doono. Sharciyada waxbarashada Gudiga ee halkan lagu sheegay waxa lagu samayn doonaa dib u eegista iyo wax ka badal. Nuqulo ka mid ah sharciyada Gudiga Wax barashada ayaa laga helaa Dugsiga Dadwaynaha Denver oo kasta ee bogga webka dugisga; www.dpsk12.org- Shariyadaha Gudiga Wax barashada. Haddii aad hayso wax su'aal ah oo ku saabsan arimahan, fadlan la xidhiidh maamulaha dugsigaaga, ama Tilifoonka Xarunta Soo dhawaynta 720-423-3400 TTY-TDD 720-423-3741.

Juun 2011

Guddiyada Iskaashiga Dugsiga – Sharciga BDFH

Fiiga Ardayga, Ganaaxa, iyo Khidmadaha

Siyaasada JQ ee Dugsiyada Dadwaynaha Denver,(DPS ama Degamda) kaas oo lagu baadhay xafiiska maamulaha, waxa uu u dagajiyaa fiiga iyo Khidmadaha sidan soo socota :

- Wax kharash ah ma leh buugta aan loo isticmaalin manhajka caadiga ah;
- Kharashaadka qiimaha caadiga ah ee agabka ee dheer baahiyaha aasaasiga ah waxa dib loogu soo ciliyaa ardayda*,
- Kharashaadka loogu talogalay ciyaaraha dugsiyada ka dhexeeya*,
- Kharashka lagu soo dallaco baaritaanka jimicsiga jirka ee ka dhexeeyo dugsiyada loona baahan yahay sannad kasta – waxaa mas'uul ka ah waalidka/ilaaliyaha ;
- Kharashka lagu soo dallaco buugaagta meeleynta hore iyo imtixanaadka;
- Kharashka lagu soo dallaco buugaagta lumay/la khasaariyay iyo buugaagta maktabka; iyo
- Kale - Fiiri Sharciyada DPS JQ.

Ma jiraan khidmado, ganaax, ama kharash lagu soo dallaco ardayda saboolka ah marka laga reebo kharashka dhabta ah ee ku baxa alaabta, kuwaasoo noqda hantida u gaarka ah ardayga. Ardayga saboolka waa midka loo arko in uu xaq u leeyahay qadada lacag la'aanta ah ama la dhimay sida hoos timaado Tilmaamaha Saboolka Dakhliga Qaranka (National Income Poverty Guidleines). Waalidka ama ilaaliyaha waxay la xariiri karaan xafiiska Agaasimaha haddii waalidka aaminsan yahay in cunugga uu xaq u leeyahay

**Dallacaadaan waxaa lagu dabaqaa oo keliya haddii ardayga uu doorto in uu ka qeybgalo hawsha.*

Sharciga Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Asturnaanata ("FERPA")

Sannad kasta, DPS waxay ogeysiiskaan siisaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha iyo ardayda xaqa u yeesha xagga xuquuqda ay leeyahiin sida hoos timaado FERPA. Diiwaanka Ardayga/Sii Deynta Macluumaadka ku saabsan Ardayda (Sharciyada JRA/JRC) waxaa laga heli karaa Dugsiyada Dadweynaha Denver iyo bogga internetka DPS: www.dpsk12.org/ Sharciyada - Guddiga Dugsiga . Ashtakooyinka ku saabsan jebinta xuquuqda la siiyo waalidiinta ama ardayda xaqa u yeelata waxaa loo jeedin karaa Denver Public Schools, Office of Student Records, 900 Grant Street, Denver, CO 80203 ama Family Policy Compliance Office, U.S. Department of Education, 400 Maryland Ave SW, Washington DC 20202-4605.

Xuquuqda: Sharciyada federaalka iyo gobolka ayaa badbaadiyo asturnaanta diiwaanka waxbarashada ardayga. Sharciga wuxuu kaloo waalidiinta iyo ardayda (18 sanno ama ka weyn) loo ogol yahay xaqa ay ku baaraan kuna fiiriyaan diiwaankooda muddo 45 maalin gudahooda laga bilaabo maalinta Dagmada hesho codsi ku saabsan in ay helaan; in ay codsadaan in dugsiga saxo diiwaanka loo arko in aysan sax ahayn ama marin habaabiya; iyo in ay kantaroolaan sii deynta diiwaanka iyadoo aan ogolaasha qoran laga haysanin waalidka/ardayga loo ogol yahay sida sharciga iyo Sharciyada Dagmada JRA/JRC ogol yahiin. Koobiyada diiwaanka ardayga waxaa la siin doonaa waalidiinta/ardayda loo ogol yahay kaddib marka ay codsadaan, kharashkana kama badan doono $1.25 halkii bog.

Hababka Fiirinta/Baarista Diiwaanka: Waalidiinta ama ardayda loo ogol yahay waa in ay agaasimaha dugsiga ama xafiiska diiwaanka ardayga ee Dagmada u soo gudbiyaan, haddii ardayga uu qalin jebiyay ama ka tagay dugsiga, codsi qoran oo tilmaama diiwaanka ay rabaan in ay baaraan. Agaasimaha ama shaqaalaha kale ee Dagmada waxay sameyn doonaan qorshe ay ku helaan kana ogeysiiyaan waalidka ama ardayga loo ogol yahay waqtiga iyo goobta lagu baari karo diiwaanka. Waxaa dhici karto in xafiisyada dugsiga la xero xilliga kuleylaha. Waalidiinta ama ardayda loo ogol yahay ee u baahan in diiwaanka dugsiga lagu haayo dugsiga waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay codsadaan koobiyada kahor inta aysan dhamaanin sannad dugsiyeedka.

Hababka Lagu Baddalo Diiwaanka*:* Waalidiinta ama ardayda loo ogol yahay ee rabta in ay Dagmada weydiistaan in wax laga baddalo diiwaanka waa in ay u soo qoraan agaasimaha dagmada, si cad u tilmaamaan qeybta diiwaanka ay rabaan in la baddalo, iyo in ay sheegaan sababta loogu baahan yahay in la baddalo. Haddii dagmada go'aan ku gaarto in ay wax ka baddasho diiwaanka sida waalidka ama ardayga loo ogol yahay codsaday, Dagmada waxay waalidka ama ardayga loo ogol yahay ogeysiin doontaa go'aanka, waxayna kala talin doontaa xaqa ay u leeyahiin dhageysi ku saabsan codsiga baddalaadda**.** Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hababka dhageysiga ayaa la siin doonaa waalidka ama ardayga loo oggol yahay marka la ogeysiiyo xaqa ay u leeyahiin dhageysiga**.**

Kashifaadda Aan Loo Haysanin Ogolaasho Hore*:* Hal ka-dhaafid, oo fasaxa kashifaadda aan loo haysanin ogolaasho, waa kashifaadda la siiyo saraakiisha dugsiga ee haysta danno waxbarasho oo sharci ah. Sarkaalka dugsiga waa shakhsi Dagmada ugu shaqeeyo sida maamule, kormeere, tababare, ama xubin ka tirsan shaqaalaha kaalamada bixiya (kana mid ah shaqaalaha caafimaadka ama dawooyinkia iyo shaqaalaha unugga hirgelinta sharciga): shakhsi ku jira Guddiga Dugsiga; qof ku shaqeeyo, loo ogol yahay in uu ku shaqeeyo, iskaa wax u qabso ama waalid ama arday ka shaqeeyo guddi rasmi ah, sida guddiga dishibiliinka ama ashtakada, ama kaalmeeya sarkaal kale oo ka tirsan dugsiga si uu u fulliyo shaqadiisa ama shaqadeeda. Sarkaalka dugsiga waa shakhsi ama shirkad ay Dagmada la gashay heshiis si uu u bixiyo adeeg baddalkii ay isticmaali lahayd shaqaalaheeda ama saraakiisha (sida qareenka, xisaabiyaha, la-taliyaha caafimaadka ama daweeyaha), balse si toosan u hoos yimaada kantaroolka Dagmada kuna heshiiyay in uusan dib u qeybinin macluumaad qof ahaan la aqoonsan karo.

Dagmada waxay isticmaali doontaa habab macquul ah si loo hubsado in saraakisha dugsiga helaan oo keliya diiwaanka macluumaadka ay u qabaan danno waxbarasho oo sharci ah. Saraakiisha dugsiga waxay leeyahiin danno waxbarasho oo sharci ah haddii saraakiisha u baahan yahiin in ay fiiriyaan diiwaanka waxbarashada sida waafaqsan waajibaadkooda rasmiga ah marka ujeedada tahay: a) raadinta macluumaadka laga laga soo qaado diiwaanka ardayga si kaalmo loo siiyo waalidka ama ardayga loo ogol yahay xagga horumarinta waxbarashada ardayga; b) la kaalmeeyo xajinta diiwaanka; c) fullinta cilmi baarista waxbarashada ay soo ogoladeen shaqaalaha maamulka; ama d) xajinta jawi ammaan ah oo nidaamsan.

Kaddib marka la codsado, ogolaasho la'aan, Dagmada waxay diiwaanka waxbarashada u kashifi doontaa saraakiisha dugsi kale uu ardayga ka raadsado ama ku talo jiro in lagu qoro, ama horay loogu qoray, hase ahatee ujeedada kashifaadda waa in ay la xariirto diiwaan gelinta ardayga ama wareejinta; ama wakaalad kale sida waafaqsan sharciga gobolka iyo sharciyada Dagmada. Macluumaadka dishibiliinka, kana mid ah tan laga soo qaado dugsi hore oo ku yaalo dagmada, waxaa la gaarsiin doonaa macalin kasta iyo la-taliye kasta oo xariir toosan la leh ardayga; qofka noocaas waa in uu xajiyo sirta macluumaadka mana laha awood uu ku gaarsiiyo dadka kale.

Macluumaadka Xogta*:* Dagmada waxay kashifi kartaa macluumaadka "xogta" haddii waalidka/ardayga loo ogol yahay aysan qoraal ahaan sannad kasta diidin kashifaadda noocaas una gudbinin Maamulaha muddo labo todobaad gudaheeda, diiwaan gelinta kaddib. Macluumaadka Xogta waxaa ka mid ah: Magaca, taariikhda dhalashada, ahaashada lab ama dhedig, ka qeybgalka hawlaha rasmi ahaan la aqoonsan yahay, miisaanka iyo joogga dadka jimicsada, shahaadooyinka iyo abaal marinta la qaatay, taariikhda la tagay iyo sawirada.

Macluumaadka Daawada: Dagmada waxay dhinacyada ku habboon siin kartaa macluumaadka qofka lagu aqoonsan karo ee laga soo qaado diiwaanka waxbarashada, taasoo la xariirta arrin degdeg ah, haddii ogaashada macluumaadka tahay lagama maarmaan si loo badbaadiyo caafimaadka ama ammaanka ardayga ama shakhsiyaadka kale.

Badbaadinta Baddalaadda Xuquuqda Cunugga (Pupil Rights Amendment) ("PPRA")

PPRA waxay waalidiinta siisaa xuquuq ku saabsan sida loo fulliyo wareysiyada, aruurinta iyo isticmaalka macluumaadka suuqgeynta, iyo qaar ka mid ah baaritaanka jirka. Waxaa ka mid ah xaqa loo leeyahay:

- ***Ogolaashada*** ka hor inta ardayda aan laga dalbanin in ay qaataan wareysi laga helo mid ama ka badan arrimaha soo socda ("wareysiga macluumaadka la badbaadiyo") haddii wareysiga uu qeyb ahaan ama si buuxdo u maal geliyo barnaamij ka tirsan barnaamijyada Waaxda Waxbarashada Mareykanka (U.S. Department of Education) ("ED").

1. Sharciyada uu raacsan yahay ama diinta ardayga ama waalidka ardayga;

2. Dhibaatooyinka madax ama cilmi nefsiga ay qabaan ardayga ama qoyska ardayga;

3. Dabeecadda ama dhaqanka kacsiga;

4. Dabeecad sharci darro ah, ka soo horjeeda bulshada, qofka naftiisa eedeeya ama naftiisa liida;

5. Qiimeynta muhiimka ee lagu sameeyo dadka kale ay dadka quseyso la leeyahiin xariir sokke xagga qoyska;

6. Xariir sharci ahaan la aqoonsan yahay, sida xariirka lala leeyahay qareenada, takhaatiirta, ama wadaadada;

7. Dhaqanka diinta, dariiqadaha laga tirsan yahay, ama waxyaabaha uu aaminsan yahay ardayga ama waalidiinta; ama

8. Dakhliga, marka laga reebo sida sharciga rabo si loo ogaado xaq u yeelashada barnaamijka.

- ***Helidda ogeysiis iyo fursad looga saaro ardayga:***

1. Wareysi kale oo ku saabsan macluumaadka la badbaadiyo, iyadoo aan la fiirinin maal gelinta;

2. Baaritaan kasta ama fiirin kasta lagu sameeyo jirka oo aan ahayn degdeg, taasoo shardi u ah imaashada, lagana qaato dugsiga ama wakiilkeeda, oo aan lagama maarmaan u ahayn si loo badbaadiyo caafimaadka degdegga iyo ammaanka ardayga, marka laga reebo maqalka, aragga, ama baaritaanka "scolliosis", cudurka ku dhaco laf dhabarka, ama baaritaan kasta ama fiirin kasta oo lagu sameeyo jirka, sida sharciga Gobolka ogol yahay ama uu rabo; iyo

3. Hawlaha ku lug leh aruurinta, kashifaadda, ama isticmaalka macluumaadka shakhsiga ee laga helo ardayda xagga suuq geynta ama iibka ama macluumaadka loo qeybiyo dadka kale.

- ***Baaris marka la codsado iyo ka hor inta aan la siinin ama la isticmaalin:***

1. Wareysiyada macluumaadka la badbaadiyo ee laga qaado ardayda;

2. Qalabka la isticmaalo si macluumaadka shakhsiga looga aruuriyo ardayda xagga suuq geynta, iibka ama qeybinta la soo jeediyay; iyo

3. Alaabta wax lagu baro ee la isticmaalo, taasoo qeyb ka ah manhajka waxbarashada

Xuquuqdaan waxay ka wareegaan waalidka, waxayna u wareegaan ardayga jira 18 sanno ama cunugga qaan gaarka ah sida hoos timaado sharciga Gobolka.

Dagmada waxay soo saari doontaa, waxayna ku dhaqmi doontaa siyaasado, iyadoo la tashan doonto waalidiinta, xagga xuquuqdaan, iyo qorshaha lagu badbaadiyo asturnaanta ardayga xagga siinta wareysiyada macluumaadka la badbaadiyo iyo aruurinta, kashifaadda, ama isticmaalka macluumaadka shakhsiga xagga suuq geynta, iibka, ama ujeedooyinka qeybinta kale.
Kuwa soo socdo waa liis ku saabsan hawlaha qaar iyo wareysiyada u baahan ogeysiiska sannadka:

- ✓ Aruurinta, kashifaadda, ama isticmaalka macluumaadka shakhsiga xagga suuq geynta, iibka, ama qeybinta kale;
- ✓ Siinta wareysiga macluumaadka la badbaadiyo, qeyb ahaan ama si buuxdo aysan u maal gelinin ED; iyo
- ✓ Baaritaan kasta ama fiirin ee lagu sameeyo jirka, kaaso aan gudaha u galin, aan hayn degdeg, sida lagu sharaxay kor.

Iyadoo adeegsaneysa isgaarsiinta sida Boostada Mareykanka (U. S. Mail), dagmada waxay si toos ah u ogeysiin doontaa waalidiinta ardayda loo qabtay in ay ka qeybgalaan hawlaha qaar ama wareysiyada kor lagu sheegay, waxayna waalidka siin doontaa fursad uu cunugiisa ama cunugeeda uga saarto ka-qeybgalka hawsha ama wareysiga. Bilowga sannad dugsiyeed kasta, dugsi kasta wuxuu waalidiinta ogeysiin doonaa qiyaasta taariikhda la filaayo in ay dhacaan hawlaha/wareysiyada kor ku qoran.

Xagga wareysiyada iyo hawlaha la filaayo kaddib marka sannad dugsiyeedka bilowdo. Waalidiinta waxaa la siin doonaa ogeysiis macquul ah oo ku saabsan hawlaha la qorsheyay iyo wareysiyada kor ku qoran, iyo waxaa la siin doonaa fursad ay cunugooda uga saaraan hawlaha iyo wareysiyada noocaas. Waalidiinta waxaa kaloo la siin doonaa fursad ay ku fiiriyaan wareysiyada munaasabka ah.

Macluumaadka La Siiyo Shaqaaleynta Ciidamada

Marka shaqaaleynta codsato, magacyada, cinwaanada guriga iyo nambarada telefoonka ardayda dugsiga sare waxaa la siin doonaa shaqaaleynta ciidamada haddii sannad kasta waalidka/ardayga aysan qoraal ahaan u diidin una gudbinin Maamulaha in la sii daayo. Shaqaaleynta waxay kaloo macluumaadkaan u isticmaali karaan in ay bixiyaan macluumaad ku saabsan adeegyada ciidamada. Sida waafaqsan sharciyada Guddiga JRA/JRC, dagmada waxay horay u siin doontaa waalidiinta ogeysiis qoran oo ku saabsan sii deynta macluumaadka. Waxaa ku jira tilmaamo tafatiran oo ku saabsan diidmada sii deynta macluumaadka. Waalidka ama ardayga waxay codsan karaan in aan la sii deynin magaca ardayga, cinwaanka, iyo telefoonka ku qoran haddii aan horay loo haysanin ogolaashada waalidka oo qoran.

Macluumaadka Loo Sii Daayo Medicaid

Sida bixiyaha Medicaid, DPS waxay Sharciyada Daryeelka Caafimaadka iyo Maal Gelinta (Health Care Policy and Financing) (HCPF) ka heli doontaa macluumaadka ku saabsan xaq u yeelashada Medicaid ee ardayda ku qoran DPS. HCPF waa wakaalad ka jirta gobolka ee loo xil saaray Medicaid. Macluumaadka xogta magaca, taariikhda dhalashada, iyo ahaashada lab ama dhedig waxaa la siin doonaa HCPF si loo xaqiijiyo xaq u yeelashada Medicaid ee ardayda ku sugan Dagmada. Sharaxaadda caafimaadka iyo adeegyada la xariira caafimaadka ee la siiyo ardayda xaqa u yeeshay Medicaid waxaa la siin doonaa Medicaid iyo/ama wakiilka dallacaadda kharashka ee Dagmada si loo sugo maamulka habboon ee barnaamijka. Diiwaan qoran oo ku saabsan dhamaan ganacsiga ayaa lagu hayn doonaa xafiiska Medicaidka Dugsiga DPS (DPS School Medicaid).

Sharciga VI, IX, ADA, Qeybta 504 (Title VI, IX, ADA, Section 504)

DPS ma sameyso takoor ku saleysan isirka, midabka, diinta, asal qaran ama abtirsiino, ahaashada lab ama dhedig, da', itaal darri xagga gelitaanka ama ogolaashada, ama daweynta, xagga barnaamijyadeeda ama hawlaheeda. Waxaa jira habka cabbashada oo wax looga qabto arrimaha takoorka. Waxaa dhici karto in su'aalaha ama ashtakooyinka ku dooda talaabadaha takoorka loo jeediyo Mareykanka. Department of Education Office for Civil Rights, 1244 Speer Boulevard, Denver, CO 80204-3582 ama shaqaalaha loo xil saaray DPS sida soo socota: Agaasimaha Adeegyada Ardayga/Adeegyada Taakuleynta (Director of Student Services/Support Services) (telefoonka 720-423-3437 ama TTY-TDD: 720-423-3741), Qeybta 504, Sharciga Dayactirka ee 1973 (Rehabilitation Act of 1973), sida la baddalay (29 U.S.C. §794) iyo Sharciga Mareykanka Itaalka Darran (Americans with Disabilities Act), sida la baddalay (42 U.S.C. §12101 et seq.) wuxuu quseyaa; Sarkaalka Madaxa Ilaha Aadanaha (Chief Human Resource Officer) (telefoonka 720-423-3900) xagga Sharciga IX ee Baddalaadda Waxbarashada (Education Amendments) ee 1972 (20 U.S.C. §1681) arrimaha eexashada lab/dhedig.

Kaddib marka la codsado, fududeyn macquul ah ayaa la siin doonaa dadka qaba itaal darri ee raba in ay ka qeybgalaan hawlaha Dagmada/dugsiga. Fadlan la xariir dugsiga/waaxda ugu yaraan saddax maalin oo shaqo ah ka hor inta aan la bilaabin hawsha.

Aqoonsiga Isirka iyo Jinsiyadda Ardayga

Si loogu hoggaansamo sharuudaha warbixinta federaalka iyo gobolka, DPS waxay aqoonsatay isirka ama jinsiyadda arday kasta, taaso ku saleysan macluumaadka laga helay waalidka/ilaaliyaha. Guddiga Waxbarashada, iyadoo adeegsaneysa go'aan la gaaray Meey 1975, waxay rabtaa in waalidiinta, sannad kasta, la ogeysiiyo in aqoonsigaan la sameyay. Haddii aad rabtid in aad ogaatid aqoonsiga la qoray, ee loo sameyay cunugaada, waxaad macluumaadkaan ka heli kartaa dugsiga cunugaada. Haddii aqoonsiga uusan sax ahayn, shaqaalaha dugsiga ayaa sharaxi doonaa hababka loo saxo.

Waxbarashada Ardayda Itaalka Darran

Arday kasta oo xaq u yeesha oo qaba itaal darrida waxbarashada ee daggan Denver, da'da 3 ilaa samastarka, waqtiga ardayga gaaro 21 sanno, wuxuu xaq u leeyahay waxbarashada dadweynaha ku haboon ee lacag la'aanta ah, mana jiro kharash laga qaado ardayga ama waalidka/ilaaliyaha marka laga reebo khidmadaha la saaro ardayda aan itaalka darneyn ama waalidiintooda/ilaaliyehooda. DPS iyadoo kaashaneyso wakaaladaha kale ee bulshada waxay raadisaa in ay aqoonsato, qiimeyso, ogaato xaq u yeelashada xagga adeegyada faragelinta hore, iyo waxay qoysaska ku

kaalmeysaa meeleynta ku habboon ilaha iyo isku duwidda adeegga, bulshada gudahdded la siiyo caruurta ka yar 3 sanno.
Su'aalaha waa in loo jeediyo agaasimaha dugsiga uu tago ardayga ama Xafiiska Waxbarashada Khaaska (Office of Special Education) (720-423-3437). Waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxay xaq u leeyahiin in ay cunugooda u diraan qiimeyn si uu u helo adeegyada Waxbarashada Khaaska (Special Education).

Dhishibiliinka Ardayga – Sharciyada JK (sidoo kale eeg sharciyada JK-R ee Hababka Anshaxa iyo Dhishibiliinka Ardayga, iyo Dishibiliinka JKF ee Ardayga Naafada ah)

Deegaan dugsi kaas oo amaana nidaamsan oo ka madhan kharibaad aan lagama maarmaan ahayn waxay muhiim u tahay horumarinta hadafka degmada oo waana isku xidhka masuuliyada ardayga, shaqaalaha, waalidka, iyo bulshada.

DPS waxa uu raadiyaa in uu gaadhsiiyo dhishibiliin ugaar ah arday kasta isagoo kula xidhiidhaya xeerarka anshaxa ardayga, waxbarid iyo gaadhsiin habdhaqano ku haboon, iyo ku qabashada ardaydu ficilada ay sameeyaan. Ka hortagis ayaa awooda la saari doonaa oo mashaakilkana si dhakhso ah ayaa loo soo sheegi doonaa. Cimilo dugsi oo togani waxay qayb muhiim ah ka tahay barnaamij dhishibiliin oo saamayn leh.

Ficiladan soo socdaa waa mamnuuc, oo waxa uu ardaygu wajihi karaa ficil dhishibiliin:

1. Habdhaqanka alaabta dugsiga marka dugsiga la joogo iyo dibadiisaba, kaas oo dhaawacaya deeqaha ama aminga ardayda kale ama shaqaalaha dugsiga waxana ka mid ah habdhaqano u kas ah ama masuuliyad daro ah kaas oo khatar ku ah dhaawac jidheed oo qof kasta ah;
2. Habdhaqano uu ku faro galinayo awooda dugsigu uu ku siiyo fursado waxbarasho ardayda kale;
3. Kharibista alaabta dugsiga, baabuurta dugsiga, ama dhacdooyinka dugsiga;
4. Keenista, qaadista, isticmaalka, ama lahaanshaha hub khatar ah, sida ku qeexan siyaada;
5. Ficilo la xidhiidha dib jirnimo waxana ka mid ah astaamaha la xidhiidha dibjirnimada sida midabo, calaamado gacmaha ah, gidaar wax kuqoris, maryo, qalabka dumarku isku qurxiyaan, buug, calaamadaha ganacsiga, iyo wax kasta oo ka qaybqaata ka mid noqoshada dibjirnimada sida ay go'aansatay ama mamnuucday maamulka dugsigu wakhti ilaa wakhti;
6. Ku iibinta, qaybinta, lahaanshaha, isticmaalka, ama in aad saamayn ku leedahay, khamri, xashiishad, ama walxaha la kaantaroolo, alaabta dugsiga ama baabuurta dugsiga;
7. Dagaal;
8. Aflagaado;
9. Boob;
10. Xadid, boobis, ama jabin oo galid ah;
11. Isticmaalid ama lahaansho sigaar;
12. Ka samaynta eedaymo been ah oo dhibaatayn ilmo ah oo shaqaalaha dugsiga ah;
13. Dhibaatayn;
14. U xoog sheegad;
15. Burbrinta ama kharibida alaabta dugsiga iyo alaabta dadka kale;;
16. Isticmaala hadal cay ah ama xumo;

17. Isticmaala dacaayado, ay ka mid yihiin laakiin aan ku xadidnayn kuwa ku salaysan naafada, qabiilka, jinsiga, midibka, diinta, ama arimaha galmo ama aqoonsigga jinsiga;
18. Muuqaalka qofeed ama bilaa nadaafad taas oo xun;
19. Rabshadaynta dugsiga degmada ama ama koodhka cinwaanka dugsiga ama xidhashada dhar loo haysto in rabshad yihiin;
20. Adeecid la'aan madax adayg ku salaysan ama furitaan ama ku madax adayg joogto ah oo maamullka dhabta ah;
21. Garaacis, anshax khariban ama anshax danbiile ah oo qof ku wajahan shaqaale ama tabaruce qof wayn ah ee qofka ama alaabta dugsi kasta;
22. Anshaxa dugsiga gudihiisa iyo dibadiisa kaas oo sababaya rabash danbi ah, haddii uu ku kaco qof wayni, iyada oo aan loo eegayn haddiba arday kale ama shaqaale dugsi ku lug leeyahay;
23. Hanjabaad toos ah ama aan toos ahayn oo ku lid ah shakhsiyaad ama hanti;
24. Si joogto ah ugu faragaliyaa awooda dugsigu uu ku bixinayo fursado waxbarasho ardayda kale;
25. Cadaynta arday caadaystay arbushaad, sida arday laga mamnuucay dugsiga seddex ama ka badan oo jeer xili dugsiyeedkii si anshax xumo ah kaas oo sababay kala go maadi ah oo wayn taas oo bilaabay, gardaro, iyo gardaro cad oo dhinaca ardayda ah; oo ka dhacday fasalka dhexdiisa, dugsiga, dhulka dugsiga, baabuurta dugsiga, ama ficilida dheeradka ah ama dhacdooyin.

Hababka dhisibiliinka waxa loogu deeqi doonaa hab bilaash ah, oo jooto ah oo si joogto ahna loo isticmaalayo, oo ka caawin abuuritaanka jawi ku haboon waxbarashada dugsi kasta iyo fasal kasta. Ogaysiiska mabnuuca ee maamulaha ama ka saarista ee maamulka ayaa loo samayn doonaa waalidka iyada oo la raacayo xeerka iyo sharciga. Waalidku waxay xaq u leeyihiin in ay rafcaan ka qaataan ficilada qaar iyadoo la raacayo sharciga gobolka iyo sharciga JK ee Degmada. Nuqulada Sharciga JK, Anshax Ardayga iyo Dhishibiliinka, waxa laga helaa xafiiska maamulaha ama barta internetka DPS ee: **www.dpsk12.org** – Gudiga Dugsiga- Sharciga.

Cunugna Loogama Tagaayo Gadaal - Xaqa Waalidka u Leeyahay in uu Ogaado

Waaldiinta arday kasta ee taga dugsi waxay codsan karaan macluumaad ku saabsan aqoonta loo aqoonsaday macalinka (macalimiinta) fasalka ardaygooda. Macluumaadka la dalban karo waxaa ka mid ah:

- Haddii macalinka la kulmay habka shatti bixinta gobolka xagga heerka (heerarka) darajada iyo maadada (maadooyinka) la baro;
- Haddii macalinka uu wax ku baro xaalad degdeg ah ama xaalad ku meel gaar ah iyo habka shatti bixinta gobolka ee laga dhaafay;
- Shahaadada kowaad (undergraduate degree) macalinimada iyo shahaadadda labaad (graduate certification) ama digriiga uu haysto macalinka, kana mid ah maadada dishibiliinka ama digriiga; iyo
- Haddii kaaliyeyaasha aqoon yahanada (paraprofessionaals) ay adeegyo siiyeen cunugga, aqoontooda.

Waalidiinta raba in ay codsadaan macluumaadkaan waa in ay wacaan dugsiga cunugooda. Boostada ayaa loogu soo diri doonaa macluumaadka.

Waalidiinta waxay xaq u leeyahiin in ay lug ku yeeshaan qorsheynta, fiirinta iyo horumarinta qorshooyinka horumarinta dugsiga oo idil xagga dugsiyada Sharciga 1aad iyo qorsheynta isticmaalka 1% qeybta loo dhigay ku lug yeelashada waalidka. Waalidiinta waxay kaloo xaq u leeyahiin in loo sharaxo manhajka dugsiga iyo qiimeynta la isticmaalo si loo xisaabo horumarka uu gaaray cunugooda xagga heerarka aqoonta loo baahan yahay. Waalidiinta ardayda tagta

dugsiyada Sharciga I oo loo xil saaray in ay ku jiraan talaabada sixidda ama dib u dhis waxay xaq u leeyahiin in ay lug ku yeeshaan go'aanada laga gaaray talaabadaha laga qaaday heerka dugsiga iyadoo laga jawaabaayo waxyaabahaas loo xil saaray. Fadlan la xariir dugsigaada si aad u aragtid sida aad lug ugu yeelan kartid.

Waalidiinta waxay xaq u leeyahiin in ay arkaan, iyo in ay helaan kaarka warbixinta NCLB ee dugsiga cunugooda (caruurtooda). Kaararka warbixinta dugsiga waxaa
laga heli karaa http://schoolforms.dpsk12.org/schoollist. ama ka hel warad nuqul ah adoo qaraacaya720-423-3054.

Xulashada Dugsiga

Habka "Xulashada" DPS wuxuu ardayda u ogol yahay in ay dalbadaan Dugsiga Dadweynaha Denver ee aan ahayn dugsiga u adeega meesha ay daggan yahiin. Habkaan wuxuu kaloo ogol yahay arjiyada ardayda ka baxsan magaalada Denver. Waxaa jira saddax muddo oo la soo gudbin karo arjiyada: Wareegga kowaad, Wareegga Labaad, iyo muddada Wareejinta Maamulka (Administrative Transfer). Wareegga Kowaad, xagga sannad dugsiyeedka soo socda, wuxuu socdaa bisha Janaayo oo idil. Wareegga Labaad wuxuu bilowdaa in yar kaddib dhamaadka Wareegga Kowaad iyo wuxuu socdaa qiyaas ahaan 2 todobaad marka la galo sannad dugsiyeedka xiga. Habka Wareejinta Maamulka wuxuu socdaa inta ka hartay sannad dugsiyeedkaas.

Wareegga Kowaad, marka ay jiraan dalab badan marka loo fiiriyo boosaska la heli karo, waa la ogoladaa ardayda taasoo ku saleysan nambarka aan kala sooca lahayn ee la siiyo iyo koodka kala hormarinta (taasoo ah kuwa horay u taga dugsiga, kuwa ku soo noqda xaafadda guriga, hormarinta walaalaha, Cunugna Loogama Tagaayo Gadaal, dalbadaha daggan Denver (kuwa ku nool magaalada gudaheeda/xuduudda dagmada), walaalaha aan dagganeyn iyo kuwa soo dalbada. Marka boos la heli karo, waa la ogolaan doonaa kuwa soo dalbada Wareegga Kowaad.

Waqtiga Wareegga Labaad, waxaa la ogolaadaa arjiileyaasha hadba sida ay u soo kala horeyeen loona ogolaadaa sida ku saleysan ee loo helo boos kaddib marka la meeleeyo arjiileyaasha Wareegga Kowaad.

Si loo dhamaystiro Wareejinta Maamulka (Administrative Transfer), waa in la dhamaystiro arjiga ayna saxiixaan agaasimeyaasha soo dira iyo midka qaabila ka hor inta uusan ogolaanina ama diidin maamulaha dagmada. Arjiga wuxuu u baahan yahay in la sheego sababta wareejinta. Waa la diidi karaa Wareejinta Maamulka haddii aysan jirin oo keliya boos ama barnaamij, dishibiliin ama asbaab la xariirta ammaanka, sabab la xariirta waxbarashada, ama maxaa yeelay waa lala soo daahay codsiga samastarka.

Intaas waxaa dheer, sida waafaqsan Sharciga Cunugna Loogama Tagaayo Gadaal ee 2001, ardayda DPS ee daggan xaafadda dugsiyada Sharciga I ee aan la kulmin bartilmaameedyada horumarka sannadka waxay fursad u haystaan in ay tagaan dugsiyada DPS ee kale, waxaana la siin doonaa gaadiid sida waafaqsan sharciyada DPS (gaadiidka dugsiga sare waxaa bixiya basaska RTD). Ardayda waxaa ogeysiis loogu soo diraa boostada haddii fursadaan iyaga quseyso, iyo arjiyadana waxaa looga shaqeeya sida barbar socota Xulashada Caadiga (Traditional Choice).

Kadeedka Galmada - Sharciyada JBB/Kadeedka Ku Saleysan Isirka ama Midabka, Asal Qaran, Galmada Qofka, Aqoonsiga Lab/Dhedig, Itaal Darri ama Diin (ardayga) - Sharciyada JBBA

Arday kasta oo ku jira Dugsiga Dagmada wuxuu fursad u heli doonaa in uu wax ku barto jawi ka madax banaan kadeedka galmada ama kadeedka ku saleysan isirka ama midabka, asal qaran, galmada qofka, aqoonsiga lab/dhedig, itaal darri, ama diin. Isla markiiba waa la baari doonaa ashtakooyinka kadeedka sida waafaqsan sharciyadan Guddiga ee la xariira.

Daabacaadyada Ardayga ee la Xariira Dugsiga - Sharciyada JICEA

DPS waxay dhaqan gelisay daabacaad aqoonsan in ardayda ay leeyahiin xaqa madax banaanida hadalka iyo wargeyska, iyo ma jiro war ku jira daabacaad uu leeyahay ardayga, ha ahaato ama yeysan ahayn in dugsiga uu kafaalo qaaday daabacaadaas, lagu qaadi doono celcelin hore marka laga reebo noocyada qaar wararka lagu aqoonsaday Sharciyada Dagmada JICEA. Koobiyada Sharciyada JICEA iyo Sharciyada JICEA-R Daabacaadyada Ardayga ee la Xariira Dugsiga (Koodka Daabacaadda Dugsiga) waxaa laga heli karaa bogga internetka DPS: www.dpsk12.org/policies Guddiga Dugsiga - Siyaasadaha.

Macluumaadka Gafaha Galmada

Macluumaadka ku saabsan hababka xubnaha bulshada ku helaan macluumaadka hirgelinta sharciga oo la soo aruuriyo sida waafaqsan Sharciga Hirgelinta Diiwaan Gelinta Gafaha Galmada Colorado (Colorado Sex Offender Registration Enforcement Act) waxaa laga heli karaa internetka http:

dcj.state.co.us/odvsom/Sex_Offender/SO_Pdfs/schoolresourceguideregistration.pdf

iyo on CDE's web site at:

www.cde.state.co.us/cdeprevention/download/pdf/school_sex_offender_guide.pdf

Intaas waxaa dheer, koobiyada tilmaantaan waxaa lagu heli karaa khidmadda koobiyada $2.00 marka laga codsado Qeybta Adeegyada Ardayga (Division of Student Services). Xubnaha bulshada waxay lacag la'aan ku fiirin karaan warqadda, taasoo lacag la'aan lagala soo bixi karo bogagga internetka kor ku qoran.

Waajibka Imaashada Waalidka

Waalid kasta waxaa saaran waajib sida waafaqsan sharciga Colorado si loo hubsado in cunugooda uu helo waxbarasho iyo tababar ku filan. Sida waafaqsan, cunugga waalid kasta oo ka weyn todobo sanno kana yar toban iyo todobo waxaa saaran waajib in uu hubsado in cunugga noocaasi uu tago dugsiga.

Sharciyada IHBEA- Ee ingiriisigu uu Luuqada Labaad yahay

Ujeedada gobolka Colorado ee sii wadida ugu deeqida fursado waxbarasho oo dheeraad ah ee ardayda aan luuqadooda koowaad ayna ahayn ingiriisi, degmadu waxay siin doontaa barnaamijyo ku haboon oo wax lagu barayo dhammaan ardaydan laga bilaabo dugsiga barbaarinta ilaa 12ka si waafaqsan shuruudaha sharciga ee gobolka iyo Waaxda Waxbarashada ee Colorado. Kan hada waxa ladejiyay 1993

Laqaatay:_____Taariikhda_____ee_____buuga_____qaadashada

LEGAL REFS.: C.R.S. 22-24-101 ilaa 22-24-105 (Heerka Xirafada Luqada Ingiriisiga) (English Language Profi-ciency Act)
1 CCR 301-10, Xeerarka 2224-R-1 ilaa 2224-R-3

Tilmaanta Sharciyada Dagmada xagga Ardayda iyo Waalidiinta

Fadlan tixraac bogga internetka DPS xagga sharciyada dagmada ugu dambeeyay ee laga helo **www.dpsk12.org/policies** ama weydiiso si aad u heshid koobiga laga helo dugsigaada.

DENVER PUBLIC SCHOOLS

900 Grant Street – Denver Colorado 80203

Telfoon 720-423-3400 Kuwa Maqalka ku Culus (D TTY-TDD) 720-423-3741